

## Ma ley ogol yahay in aan codkeyga dhiibto?

Gobol kasta wuxuu leeyahay sharchiyo u gaar ah oo ku saabsan qofka loo ogol yahay in uu codkiisa ama codkeeda dhiibato. Guud ahaan, waa inaad:



### Tahay muwaadin Mareykan

La daggan tahay bulshada aad adiga dooneysid in aad codkaada ka dhiibatid (marmar ilaa waqtiga ugu yar)



Jirtid ugu yaraan 18 sanno (bulshadaha qaar, waxaa isdiiwaan geli kara dad ka yar 18 sanno, kuwaasoo codkooda ka dhiiban kara qaar ka mid ah doorashooyinka deegaanka ama doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada)

Gobolada qaar, balse ma aha dhamaan, waxaa dhici karto in dadka qaar laga joojiyo cod bixinta taasoo ugu wacan dambi culus ay horay u galeen, go'aan ka soo baxay maxkamadda, ama waxyaabo kale. La xariir sarakiisha gobolkaada ama deegaankaada haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan xaq u yeelashadaada in aad codkaada dhiibatid. Si aad u heshid sarakiisha doorashada deegaanka, waxaad tagi kartaa [www.vote.gov](http://www.vote.gov).



## Maxaa loo baahan yahay in aan sameeyo si aan codkeyga u dhiibto?

Inta badan gobolada waxay cod bixiyeyaasha ka dalbadaan in ay isdiiwaan geliyaan ka hor inta aysan dhiibatin codkooda. Wuxaad macluumaadka gobolkaada, sida taariikhda ugu dambeeyso diiwaan gelinta cod bixiyaha, ka heli kartaa bogga internetka [www.eac.gov/vote](http://www.eac.gov/vote).



Waxaa jira gobolo badan oo u ogolaada cod bixiyeyaashooda in ay isdiiwaan geliyaan si ay codkooda ugu dhiibta internetka. Qof ahaan, waxaad kaloo iska diiwaan gelin kartaa xafiiska doorashooyinka deegaankaada adiga oo foomka diiwaan gelinta cod bixiyaha ku soo dira boostada. Waxaad halkaan ka heli kartaa tilmaamo u gaar gobolka iyo foomka diiwaan gelinta cod bixiyaha oo ku qoran 21 luqad: [www.eac.gov/voters/national-mail-voter-registration-form](http://www.eac.gov/voters/national-mail-voter-registration-form).



Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan habka cod bixinta, weydii sarkaalka doorashadaa deegaankaada.

Sarakiisha doorashada gobolka iyo deegaan ah ilaha aad loogu kalsoon yahay ee laga helo macluumaadka cod bixinta. Sarakiisha doorashada deegaanka waxay xaqijin karaan xaaladda ay ku sugar tahay diiwaan gelintaada, kaddibna waxay bixin karaan macluumaadka ku saabsan goorta iyo meesha aad codkaada ka dhiiban kartid. Waxaa kaloo dhici karto in sarkaalka doorashada deegaankaada, in uu tusaale ahaan ku siiyo warqadda cod bixinta ama macluumaad kale oo ku saabsan xafiisyada ama arrimaha ku qornaan doono warqadaada cod bixinta.

## Maxaan filan karaa marka aad doono in aan codkeyga dhiibto?

### Qof Ahaan Dhiibo Codkaada



Ka hor inta aadan tagin si aad codkaada u dhiibatid, hubso in aad ogaatid goobta cod bixinta laguugu qoray, iyo hubso waqtiyada la furi doono goobaha cod bixinta ee ku yaal gobolkaada.

Marka aad tagtid goobta cod bixinta, waa in aad iska xaadirisid shaqaalaha goobta cod bixinta si loo hubiyo in aad xaq u leedahay warqadda cod bixinta. Gobolada qaar, waxaa dhici karto in aad u baahatid in aad muujisid aqoonsiga sawirkha ay dawladda soo saarta (ID) ka hor inta aan lagu siinin warqadda cod bixinta.

### Cod bixinta Lagu Diro Boostada

Hadba sida ku xeran gobolkaada, waxaa dhici karto in aad xaq u yeelatid in warqadda cod bixinta laguugu soo diro boostada.



Ka hubso sarkaalka doorashada deegaankaada si aad u ogaatid sida boostada laguugu soo diro warqadda cod bixinta, goorta iyo goobta aad ku soo celin kartid warqadaada cod bixinta, iyo sida boostada loogala socdo warqadaada cod bixinta.

Waxaa kaloo dhici karta in lagu siiyo kaalmo marka aad dhiibaneysid codkaada. Dhamaan cod bixiyeyaasha waxay adeegsan karaan qalabka cod bixinta si ay codkooda u dhiibtaan, sidoo kale maamulada qaar bixiyaan warqadaha cod bixinta iyo qoraalo kale oo la xariira cod bixinta kuna qoran luqado aan ahayn Ingiriisi.

## Sidee ayaan kuu kaalmeyn karaa?

Cod bixiye kasta wuxuu kaalmo ka geysan karaa in doorashooyinka ahadaan kuwo xaq ah, sax ah, oo sugar. Halkaan waxaad ku arki doontaa siyaabaha aad u kaalmeyn kartid:



Is diiwaangeli si aad codkaada u dhiibatid islamarka aad xaq u yeelatid.



Haayso macluumaadka ugu dambeeyo ee cod bixiyaha. La xariir sarkaalka doorashada deegaanka haddii wax iska badalaan magacaada, cinwaankaada, ama xisbiga aad raacsan tahay.



Waxaad macluumaadka ku saabsan habka cod bixinta ka xaqijin kartaa ilaha lagu kalsoon yahay.

Ugu dambayn, sida ugu fican aad kaalmo uga geysan kartid waxay tahay in aad isku qortid kana mid noqotid shaqaalaha goobta lagu qato doorashada. Doorashooyinka waxay isku haleyaan tobanaan kun dad adiga kula mid ah si ay ugu adeegaan bulshadooda. La xariir sarakiisha doorashada deegaankaaada si aad in badan wax uga ogaatid fursadaha la xariira u adeegga bulshadaada. Halkaan ka hel macluumaadka ku saabsan gobolkaada: <https://www.eac.gov/help-america-vote>.



*Guddiga Kaalmada Doorashada Mareykanka (U.S Election Assistance Commission) wuxuu sarakiisha doorashada ku kaalmeyaa in ay horumariyaan fullinta doorashooyinka iyo wuxuu Mareykanka ku kaalmeyaa in ay ka qeybgalaan hawsha cod bixinta.*



Guddiga Kaalmada Doorashada Mareykanka  
633 3rd Street NW, Suite 200 | Washington, DC 20001  
[www.eac.gov](http://www.eac.gov)



Guddiga Kaalmada Doorashada Mareykanka  
633 3rd Street NW, Suite 200 | Washington, DC 20001  
[www.eac.gov](http://www.eac.gov)